

**Oggolaanshaha Isweydaarsiga Macluumaadka Caafimaadka**  
(Consent for Electronic Health Information Exchange Consent – Somali)

Waxaan Isbitaalada Carruurta Minnesota iyo shaqaalaha caafimaadka u oggolahay in ay kambuyuutarka ku helaan oo ay meelo kalena kula sii wadaagaan macluumaadka daryeelka feylkeyga ama feylka caafimaadka ee ilma aan anigu dhalay si ay uga wada shaqeeyaan hawlaha daryeelka iyo daaweynta.

Oggolaanshahan wuxuu shaqaalaha caafimaadka ee Isbitaalka Carruurta u fasaxayaa: 1) kambuyuutarka in ay ku codsadaan kuna heli karaan diiwaankeyga caafimaadka ama feylka caafimaadka ee ilma aan anigu dhalay si ay ugala soo wareegaan goobo kale oo aan daryeel caafimaad ka helnay aniga ama ilma aan dhalay; iyo 2) kambuyuutarka in ay diiwaankeyga caafimaadka ugu diyaariyaan si ay u sii heli karaan shaqaalaha daryeelka caafimaadka ee goobo kale oo aan daryeel ka heli karno.

Diiwaanka waxaa ku jiri kara baaris kasta, xanuunnadii la helay, daaweyn, macluumaadkaaga shakhsiga ah iyo markii lagu diiwaan geliyey si laguugu sameeyo adeegyada caafimaadka ee xaaladahaaga caafimaadka oo dhan, oo waxaa ku jira waxyaabo aan xaddidneyn, taariikhda caafimaadka qoyskaaga, arrimaha bukaanka iyo/ama taariikhda qoyska ee habdhaqanka iyo xanuunnada dhimirka, naafannimada maskaxda, isticmaalka maandooriyaha mamnuuca ah ee la qabatimo/lagu-xirnaado, xanuunnada galmada la isku qaadsiiyo, ama waxyaabahaaga dabiiciga kale ah ee taariikhda bulshada.

Haddii aad si gaar ah u codsato inaan la isticmaalin ama aan meelo kale loo sii gudbin macluumaadka caafimaadkaaga ama kuwa ilma aad dhashay, codsiyada noocaas ah ee la xiriira macluumaadka caafimaadka lagama yaabo in lagu wadaago habka isweydaarsiga kambuyuutarka ee macluumaadka caafimaadka. Shaqaalaha goobaha kale ee daryeelka caafimaadka waa in aad kala hadasho codsiyada gaarka kuu ah.

**Habka Helidda Diiwaanka Dhakhtarka**

Habka helidda diiwaanka caafimaadka waa adeeg dhakhtarkaaga ku caawinaya go'aaminta goobaha aad daryeel ka soo hesheen. Waxaan oggolaansho siinayaa Isbitaalka Carruurta iyo shaqaalaha ku lug leh daaweynta in ay soo heli karaan macluumaadkeyga ku jira habka helidda diiwaanka. Waxa aan sidoo kale oggolaansho siinayaa Isbitaalka Carruurta iyo shaqaalaha caafimaadka in ay macluumaadkeyga gelin karaan habka helidda diiwaanka si ay uga baartaan shaqaalaha kale ee caafimaadka ee aan ka heli karno daryeel iyo daaweyn.

Haddii aadan rabin Isbitaalka Carruurta iyo shaqaalaha caafimaadka in ay isticmaalaan habka helidda diiwaanka si looga soo helo macluumaadka caafimaadkaaga iyo si loo sii wadaago, waa in aad calaamadiso santuuqan.

Sida aad oggolaanshahan ku joojin karto ama uga noqon karto waa adigoo waraaq qoran u soo dira xafiiska: Health Information Management, Children's Minnesota, 5901 Lincoln Drive (Mail Stop CBC-2-HIM) Edina, MN 55436. Haddii aad joojiso ama aad ka noqoto oggolaashahan, ma jirto wax laga beddeli karo wixii xog ah oo meelo loo gudbiyey intaadan joojin ka hor.

\_\_\_\_\_

Saxiixaaga

\_\_\_\_\_

Taariikhda

Oggolaansho taleefan ah waxaa helay (Magac/Taariikh/Wakhti): \_\_\_\_\_



PLACE PATIENT LABEL HERE